

Sharci 23 Maajo 1961, lamba. 17

Isbaddalka lagu sameeyay Qod. 103 ee Xeerka Shaqada “ka koobnaanta Guddiga Dhexe Shaqada”.

MADAXWYNAHA KU-MEELGAARKA JAMHUURIYADDA

Marku arkay qoraalka meelmarinta Golaha Xeer-dejinta Qaranka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo soo socda:

Qod. 1

Qodobka 103 ee Dekereetada Baarlamaanka 15 Nofember 1958 lamba. 25 “Xeerka Shaqada”, sidaan ayaa loo baddalay:

Guddiga Dhexe Shaqada wuxuu ka koobnyahay:

- 1) Wasiirka Caafimaadka, Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada oo guddoominaya. Haddii uu maqanyahay ama ay jiraan wax ka reebaya Wasiirka, Guddiga waxaa guddoominaya Wasiir Ku-xigeenka Dawladda ee Cafimaadka, Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada, ama haddii kan dambe uu maqnyahay, Madaxa Waaxda Shaqada;
- 2) madaxa Waaxda Shaqada;
- 3) laba xubnood oo laga soo magacaabo Gudoonka Golaha Wasiirada; oo xubin kuwaas ka mid ah uu ka tirsanyahay Waaxda Qorshaynta;
- 4) xubin laga soo magacaabo Wasaatadda Dibadda;
- 5) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
- 6) xubin laga soo magacaabo Wasaarada Cafiska iyo Garsoorka;
- 7) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Warfaafinta;
- 8) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Caafimaadka, Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada;
- 9) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Maaliyadda;
- 10) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Waxbarashada;
- 11) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Arrimaha Guud;
- 12) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga;
- 13) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Beeraha iyo Cilmiga Xoolaha la Dhaqdo;
- 14) xubin laga soo magacaabo Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Isgaarsiinta;
- 15) affar xubnood oo ka wakiila shaqaalaha oo ay soo magacaabaan Ururka Guddiga Shaqaalaha;
- 16) affar xubnood oo ka wakiila loo-shaqeeyeyaasha oo ay soo magacaabaan Ururka Guddiga Shaqaalaha;
- 17) kormeeraha Shaqada Gobolka Banaadir;
- 18) kormeeraha Shaqada Degmada Muqdisho;
- 19) xubin ka wakiila Wakaaladda Badbaadada Bulshada Soomaaliya.

Xubnaha Guddiga sanad kasta waxaa lagu magcaabay Dekereeto uu soo saaro Wasiirka Caafimaadka, Xannaanada oolaha iyo Shaqada; isla qaabkaas waxaa lagu magacaabayaa

xubnaha keydka ah ee Wasiiradu iyo Wakaaladaha kale ay u soo xilsaareen in ka barbar shaqeeyaan xubnaha sida buuxda u hawlgala.

Guddoomiyaha wuxuu ugu yeeri karra in ay ka soo qaybgalaan kulamada Guddiga, iyagoo aan cod lahayn, dad kale o daneeynaya arrimaha Ajeendaha maalinta ku qoran, oo ah tiro ugu badnaan ah laba qof.

Qod. 2

Xeerkaan wuxuu dhaqangalayaa maalinta lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Jamhuriyadda.

Xeerkaan waxaa lagu soo darayaa Uruurinta Rasmiga ee Xeerarka waxaana lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta oo la soo gudbaanada wuxuu ku waajibinayaa in uu u hoggaansamo iyo in loo hoggaansamo isagoo ah Xeer Jamhuuriyadda.

Taariikhda, Muqdisho, 23 Maajo 1961.

Aadan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Koobaad

CABDI-RASHIID CALI SHERMAARKA

Wasiirka Caafimaadka, Xannaanada Xoolaha iyo Shaqada

SHEIKH CALI JIMCAALE